

## Waa maxay Xarunta Sharciyada Dadka Naafada ah ee “Minnesota Disability Law Center”?

Xarunta Sharciyada Dadka Naafada ah ee “Minnesota Disability Law Center (MDLC)” waa isku-xir looyaro iyo u-doodeyaal dadka naafada ah u sameeya caawimaad sharci oo ku saabsan kiisaska madaniga ah “civil” ee Minnesota. Waxaan caawinaa dadka naafada ah oo da’ kasta ama dhakli kasta ah. Xarunta MDLC waa mashruuc gobolka oo dhan ka shaqeeya oo hoostaga Hay’adda Dadka ka Caawisa Sharciyada ee Bartamaha Minnesota ee “Mid-Minnesota Legal Aid.”

## Waa maxay waxyaabaha ay Xarunta MDLC’s dadka ka caawiso?

**HELITAANKA.** Waxaan dadka ka caawinaa helitaanka caafimaadka, shaqada, waxbarashada, teknoolojiyada dadka caawisa iyo adeegyo kale oo la xiriira noloshu.

**HORUMARINTA HAY’ADAHA.** Waxaan ka shaqeeynaa inaan maaliyad lagu horumarinayo adeegyada dadka u raadino hay’adaha ka shaqeeya adeegyadaas.

**CUNSURIYADDA.** Waxaan la dagaalanaa cunsuriyadda la xiriirta helitaanka codeynta doorashada, adeegyada dawladda iyo hay’adaha dadweynaha u adeega.

**IS-DHEXGALKA.** Waxaan u doodnaa in dadka naafada ah si siman u dhexgalaan ama uga qeyb qaataan waxbarashada, guriyeynta, arrimaha bulshada iyo shaqada.

**DHAQAN XUMO IYO DAYACAAD.** Waxaan ka shaqeeynaa sidii aan u ciribtiri lahayn dadka oo si xun loola dhaqmo iyo in la dayaco, jir ahaan, lacag ahaan, caafimaad ahaan iyo amaan ahaan iyo dadka oo la xannibo.

Si aad u aragtid dhamaan talooyinka iyo waxyaabaha muhiimka ah, fadlan booqo websaydka [www.mndlc.org](http://www.mndlc.org).



[mylegalaid.org](http://mylegalaid.org)

**CINWANKA XAFIISKA GUUD**  
**Minnesota Disability Law Center**  
111 N. Fifth Street, Suite 100  
Minneapolis, MN 55403  
612.332.1441  
800.292.4150  
Fax: 612.334.5755  
TTY: 612.332.4668  
[mndlc@mylegalaid.org](mailto:mndlc@mylegalaid.org)

**CINWAANADA XAFIISYADA**  
**DEGMOOYINKA**  
**Duluth**  
403 Alworth Building  
306 W. Superior Street  
Duluth, MN 55802  
218.722.5625

**Fertile**  
P.O. Box 572  
Fertile, MN 56540  
218.945.3154

**Mankato**  
11 Civic Center Plaza, Suite 402  
Mankato, MN 56001  
507.389.9826



# Minnesota Disability Law Center

(Xarunta Sharciyada Dadka Naafada ah ee “Minnesota Disability Law Center (MDLC)”)

**Badbaadin iyo U doodid**  
**Hab loogu talagay Minnesota**



Mashruuca Guud ahaan Gobolka ee Hay’adda Dadka Sharciyada ka Caawisa ee “Mid-Minnesota Legal Aid”



**“Shaqaalaha Hay’adda MDLC waa kuwo si fiican u yaqaan shaqada ay qabtaan. Waa arrin aad u waanagsan in Hay’adda MDLC ay kula shaqeyso.”**

—Carrie, qof ay Hay’adda MDLC ka caawisay sidii ay u heli lahayd qalabkii caafimaadka ee ay u baahnayd

## See kuu Caawin Kartaa Hay’adda “MDLC?”

### Waan ku waacin karnaa anagoo ku siinayna:

- ✓ Macluumaad kaa caawin doona inaad xuquuqdaada fahantid
- ✓ Talo sidii aad adigu xuquuqdaada ugu doodi lahayd
- ✓ Macluumaad qoraal ah iyo in lagu diro meelo kale oo ku caawin kara
- ✓ Caaawimaad kiisaska naafada la xiriira si loo sameeyo:
  - Baaritaanka xaqaa’iqa
  - Wadahadal lala galo dhinaca kale, ama
  - In looyar kaaga dacwodo maxkamadda ama dhageysiga dacawadaha maamul

### Waxaan kaloo kuu samey karnaa:

- ✓ Inaan u istaagno inaan isbedel ku sameyno hay’adaha si ay u xalliyaan dhibaatooyinka ay soo wajaha inta badan dadka naafada ah
- ✓ Wacyigelin iyo tababar aan bulshada u sameyno
- ✓ Kaalmo farsamo la xiriirta sharciyada naafonimada oo aan u sameyno looyarada, dadka u dooda xuquuqda naafada, iyo xirfadlayaasha
- ✓ Baaritaan kiisaska qofka lacagaha sooshaal sekeyuuritiga loogu dhiibo qofka naafada ah

### NAGALA SOO XIRIIR

**Soo wac telefoonka ballanta laguugu sameeyo:**

**(612) 332-1441**  
(Magaalooyinka Minneapolis iyo Saint Paul iyo nawaaxigooda)

**(800) 292-4150**  
(Magaalooyinka ka baxsan Minneapolis iyo Saint Paul)

**(612) 332-4668**  
(Telefoonka dadka aan wax maqlin “TTY”)

### SAACADAH AAN BALLANTA SAMEYNO WAA

**Isniin illaa Jimce**

**9:30 – 11:30 a.m. (subaxnimo)**

**iyoo**

**1:30 – 3:30 p.m. (galabnimo)**

Nasiib darro, Hay’adda MDLC ma awoodo inay caawiso qof kasta oo soo waca miisaaniyaddeena oo yar awgeed iyo nidaamka kiisaska aan u aqbalno ama u kala horumarino dartood. Sidaa daraadeed kaama caawin karno:

- ✗ Difaac amar ay maxkamad kugu xukuntay in xabis ama isbitaal lagugu ahay “Commitment defense”
- ✗ Kiisaska dambiyada
- ✗ Kiisaska magdhowga shaqaalaha
- ✗ Arrimaha sharciyada qoyska sida furriinka, masuuliyadda carruurta iyo masruufka caruurta
- ✗ Dardaaranka sharciga ah ee hantida
- ✗ Cunsiriyadda ama midab fuquuqa xaga shaqada



**“Hay’adda MDLC waxay ahayd caawimaad aan helnay waqtigii ku haboonaa. Waxay naga caawiyeen habka waxbarashada gaarka ah iyagoo muujiyey aqoon iyo karti badan. Arrintaas qoyskeena aad bey u caawisay.”**

—Kim, qof ay Hay’adda MDLC ka caawisay sidii uu wiilkeeda naafada ah iskuulkiisa uga heli lahaa wxabarasho ku haboon duruufiisa.

**Booqo websaydka [www.lawhelpmn.org](http://www.lawhelpmn.org) si aad u heshid macluumaadka Hay’adda MDLC.**

*Akhbaartaan si nooc kale ayaa lagu heli karaa markaad codsatid.*